



The Royal **Children's**
Hospital Melbourne

Xanibaadyada Qofka-booqanaya RCH

Iyada oo qayb ka ah wax ka-qabashada COVID-19 ee Isbitaalka Royal Children's Hospital (RCH), lama ogola dad soo booqanaya. Xanibaadahaasi waxay saaran yihiin wallaalaha, qaraabada iyo awoowayaasha iyo ayeeyooyinka haddii loo imanayo ballanta bukaan-socodka.

Laba waalid/daryeellayaal ayaa iman kara isbitaalka si ay u booqdaan caruurtooda ama u yimaadaan ballanta bukaan socodka marka isbitaalka la booqanayo saacadaha (8da subaxii ilaa 7da fiidkii, iyo 8subaxii ilaa 8da fiidkii dhamaan goobaha caafimaadka). Laba waalid ayaa u soo raaci kara ilmahooda ballanta bukaan socodka iyada oo la qadarinaya inta qolku le'eg yahay, hal waalid keliya ayaa laga yaabaa in uu la joogo qolka la-tashiga (waalidka kale wuxuu joogayaa goobta sugitaanka). Goobaha guud, hal waalid keliya ayaa laga yaabaa inuu habeenkii la joogo taas oo la xiriirta shuruucda hadda jirta. Laba waalid/daryeelle ayaa ugu iman kara Qaybta xaalladaha degdegtah ah ilmahooda iyada oo aan ku xirnayn waqtiga.

Ilaalinta amaanka qof walba oo yimaada Isbitaalka RCH waa mudnaantayada. Marka ay jirto wax khatar ku ah bukaanka, shaqaalaha ama booqdayaasha, ama aan la ilaalin karin kala fogaanshaha, waalidka/daryeellaha waxaa laga yaabaa in aan weydiisano inay ka tagaan qolka bukaanka ama goobta daaweynta. Wuxuu isku deyi doonaa in aan yarayno xadka inta uu qaado si loo xaqijiyo in la sii wado bay'ada COVID-safe.

Fadlan yay ku soo raacin xubnaha kale ee qoyska. Looma ogolaan doono inay joogaan isbitaalka dhexdiisa waxaana la weydiisan doonaa inay ka baxaan goobta.

Waan ognaha in xanibaadyadaani ay yihiin kuwa taxadi leh waana fahamsanahay in xaalilada qoys walba tahay mid gaara. Wuxuu isku dhiirigelinaynaa in aan la hadalo kooxda daaweynaysa ilmahaaga iyo/ ama Maamulaha Kalkalisada Caafimaadka haddii aad qabto wax welwel ah. Xalalka kale ee booqashada sida telehealth ama wada-tashiga ku salaysan telefoonka ayaa la heli karaa markay ku haboon tahay.

Baarista Main Street Reception (dabaqa dhulka ah)

Waalidiinta/daryeellayaasha waxaa looga baahan yahay inay sameeyaan baarista lagu samaynayo Main Street Reception, iyada oo aan ku xirnayn inay habeenimada joogeen. Imaatinka Main Street Reception, hanaan hawleedka soo socda ayaa loo baahan yahay in la raaco:

- Waxaa lagu weydiin doonaa inaad ta'kiidiso magacaaga iyo sababta imaanshaha.
- Waxaa lagugu samayn doonaa baaritaan caafimaad oo su'aalla ah waxaana la eegayaa heer kulkaaga.
- Haddii laguu ogolaado inaad gasho, waxaa lagu siin doonaa istiikar iyo maaskiga wajiga; waxaa laga rabaa in uu mar walba muuqdo.
- Dhamaan booqdayaalka la ansixiyey waxaa waajib ku ah inay qaataan maaskiga uu bixiyey RCH mar walba markay goobta joogaan. Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad ku bedelato maaskigaaga kan qaliinka oo uu bixiyey isbitaalka RCH markaad ka gudubto baarista.
- Maaskiga waxaa laga yaabaa inaad iska qaado markaad joogto qolka halka bukaan. Iskama qaadi karto maaskigaaga markaad joogto meel la wadaagayo ama goob laba qol ah, ama Qaybtayada Xaalladaha Degdegtah ah, Rosella ama ward-ka Butterfly.
- Haddii dhakhtarka ama xubin kasta oo shaqaale oo ka tirsan RCH ay soo galaan qolka ilmahaaga, waxaa lagaaga baahan yahay inaad isticmaasho maaskigaaga cusub waqtiga wada tashiga (xubnaha shaqaaleheena ayaa qaadan doona maaskiga).
- Waan la shaqayn doonaa booqdayaasha kuwaas oo aaminsan inay leeyihii ogolaansho la xiriira qaadashada maaskiga goobaha dadweynaha. Sidaan si fiican oo aan wax kuugu qaban karo waxaad kala hadli doontaa kooxda daaweynta ilmahaaga.
- Haddii aad bedelayso waalid kale ama masuul, taasi waa inay ka dhacdaa Main Street Reception halkaa oo waalidka kale ama masuulka loo baahan yahay in lagu baaro.

Wixii intas ka baxsan oo booqdayaashaan ah waxaa loo ogolaan karaa xaallado gaara oo ogolaansho hore ee RCH.

Dhamaan dadka haysta ogolaanshaha gaarka ah waxaa la siin doonaa warqad waana in had iyo jeer qofku sitaa.

Shuruudaha RCH ee inaad nabad ahaato:

- Ha imaan haddii aadan fiyoobayn
- Dhaq gacmaahaaga markaad isbitaalka imanayso iyo markaad ka baxayso qolka ilmaha isticmaalna jel-ka gacmaaha goobaha dadweynaha
- Ku xiro maaskigaaga afka iyo sanka
- Dabool qufacaaga ama hindhisada ka dibna gacmaha nadiifi
- Ku dhaqan kala fogaanshaha jireed ugu yaraan 1.5 mitir mar walba
- Had iyo jeer raac codsiyada xubnaha shaqaalaha RCH haddii lagu weydiyo inaad ka baxdo goobta daaweynta tirada dadka jooga darteed. Amaanka ilmahaaga iyo dhamaan dadka imanaya RCH waa mudnaantayada ugu horraysa